


Poliomyelitis (Dabayl)

Xaashida xaqiiqada



Poliomyelitis, oo sidoo kale loo yaqaano dabeysha, waa cudur uu keeno fayras ku nool dhuunta iyo caloosha. Fayrasku wuxuu waxyeeleeyaa qanjidho dareeraha iyo habdhiska neerfaha wuxuuna sababi karaa dhaawac neerfaha iyo dareen la'aan jireed. Caabuqii ugu dambeeyay ee dabayl duureed Maraykanka laga helay waxay ahayd 1979.

Dabayshu waa la kala qaadaa marka la isgaarsiiyo dheecaanka cunaha ka yimaada ee qofka qaba. Dabaysha waxa kale oo la qaadi karaa marka la taabto saxarada qofka cudurka qaba.

Astaamaha iyo Calaamadaha



Qandho



Daal



Lalabo



Madax-xanuun

Inta badan dadka qaba cudurka dabeysha ma yeeshaan astaamo ama calaamado. Marka astaamaha iyo calaamadaha ay jiraan waxaa ka mid noqon kara qandho, daal, madax-xanuun, qoor iyo dhabar adayg, iyo xanuun addimada ah. Dareen la'aanta (dhinac qalalka) ayaa horseedi karta naafonimo joogto ah iyo dhimasho.

Kahortagga



Tallaalku waa sida ugu wanaagsan ee looga hortagi karo dabeysha, waana sida kaliya ee lagu joojin karo faafidda cudurka.

Wixii Macluumaad Dheeraad Ah



Kala xirii dhakhtarkaaga ama Xarunta Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada ee Maine 1-800-821-5821 wixii macluumaad dheeraad ah.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa www.cdc.gov/polio.